**Gaadiidka Ardayga ee Portland Public Schools waxay shaqaaleysiinayaan**
716 N.E. Marine Drive • Portland, AMA 97211
503-916-6901 • transportation@pps.net

Agoosto 2025

Ku socota Waalidka ama Masuulka ardayda PPS

Ku soo dhawaaw sanad dugsiyeedka cusub. Warqadaan waa in lagu ogeysiiyo waajibaadyadaada iyo shuruudahaaga sannad dugsiyeedka soo socda iyo in lagu siiyo lambarada taleefoonka, baraha interneetka, iyo ciwaanada iimaylka si aad noogu siiso jawaab celinta ama aad noola soo xariirto haddii aad qabto su'aalo.

Halkaan waxaa ku qoran sida aad qaab toos ah noola soo xariiri karto ama aad ku heli karto xog ku saabsan Gaadiidka Ardayga:

Webseedka Gaadiidka Ardayda: www.pps.net/bus
Foomamka webseedka gaadiidka ardayga warqadaan waxaa laga heli karaa halkaan. Sidoo kale halkaan waxaa laga heli karaa luuqado kale. www.pps.net/Page/179
Iimaylka: transportation@pps.net
Taleefanka: 503.916.6901

**Tallaabooyinka xiga:**

Waxaa si toos ah kuula soo xiriiri doona darawalka laguu xilsaaray waqtiyada ardayda la qaadaayo iyo waqtiyada la dejinaayo kahor inta shaqada basku bilaaban. Waqtigaas fadlan la wadaag darawalka baahiyaha ardaygaaga oo xaqiiji in waraaqaha dookhyadaada qaadista/dejinta (oo loo yaqaan ka bixida fasalka keli) yihiin kuwii ugu dambeeyay ee sanad dugsiyeedkaan.
**Haddii darawalkaagu uusan kusoo wicin ka hor maalinta aad filayso in shaqadu bilaabato, arrintaan waxay ka dhignaan kartaa in gaadiidkaaga ama meeleyntaada dugsigaaga aan si fiican loo dejin.**

**Faahfaahinada la xariira gaadiidka ardaygaaga:**

Fadlan dib u eeg shuruudaha soo socda si ardaydaada loogu qaado si badqab leh, habboon, oo waafaqsan sharciyada iyo xeerarka Waaxda Gaadiidka Gobolka Oregon iyo degmada dugsiga.

- Ardaydu waa inay diyaar u yihiin gaadiidka shan (5) daqiiqo kahor waqtiga ay u ballansan yihiin in la qaado.

- Si aad u joojiso ama aad u hakiso gaadiidka ardaygaaga fadlan soo gudbi xogta ardaygaaga oo eeg www.pps.net/Page/20963.

- Fadlan nalaga soo xiriir Waaxda Gaadiidka Ardayda haddii aad qorshayneyso inaad wareegto ama mid ka mid ah lambarada taleefankaaga ay isbadelaan. Dugsiyadu waxaa laga yaabaa inaysan noo sheegin codsigaaga waqtiga saxda ah oo habboon arrintaas oo saameyn doonta awoodeena aan ku hirgelino isbadelka. Badelka ciwaanka wuxuu saameyn karaa wadooyinka iyo waqtiga kaararka qoysas badan. Fadlan oggoloow illaa labo asbuuc isbadel kasta ama isbadelada meeleynta dugsiga in la hirgeliyo. Waxaan u baahan doonaa inaan badelno wadada ardaygaaga gaarigu la mari ama inaan ardaygaaga ka qorno gaari cusub. Xaaladahaan marka ay jiraan isbadelka noocaan oo kale ah wuxuu saameyn ku yeelanayaa qoysaska kale waxaana isbadelada ogeysiin doonaa dhammaan qoysaska saameyntu gaarto.

- Darawaladeena looma ogola inay sugaan ardayda wax ka badan laba daqiiqo in ka badan wakhtiga la qorsheeyay. Darawalku waa inuu sii socdaa haddii ardaygaagu uusan u soo bixin waqtigii loogu talagalay si uu u fuulo gaariga. Arrintaan waxaa loo sameeyaa, si loo hubiyo in dhammaan qaadista iyo dejinta ardayda loo sameeyo qaab habboon maalinta oo dhan.

- Dawarwaliinta looma oggola inay ku laabtaan goobta laga qaado ardayga haddii ardaygu seego gaariga. Gaariga waa inuu sii socdaa si uusan u seerayn jadwalkiisa. Fadlan ha wicin Gaadiidka Ardayga si aad u codsato in gaarigu wax ka badelo jadwalkiisa. Ma haysano baabuur dheeraad ah oo diyaar ah maadaama aan dib u isticmaalno baabuur kasta laba ilaa afar jeer maalintii oo dhan si aan u xadidka kharashaadka iyo jadwalada.

- Darawalada looma oggla inay isticmaalaan hoonkooda ama sameecadaha, inay qof ka wacaan taleefoonkooda gacanta, ama inay kaga tagaan ardaydooda iyadoon lala socon gudaha baabuurta marka laga reebo inay jirto maahee xaaladaha degdegga ah. (ORS 815.225)

- Waalidiinta/mas'uuliyiinta waxaa loo oggol yahay inay yimaadaan boosteejada hal mar subaxdii iyo hal mar galabtii.

- Darawaliintu daawo uma soo qaadi karaan dugsiga. Arrintaan waxay waafaqsan tahay Xeerka Guddiga Maamulka PPS iyo Dardaaranka Maamulka 4.50.027 (5)(a), "dhammaan daawooyinka ay maareeyaan shaqaalaha dugsigu waa inuu waalidku keeno dugsiga." Fadlan si toos ah ula xiriir dugsiga ama barnaamijka.

- Waxaan u baahanahay cabbirada cusub haddii ardaygaagu fuulo kursiga gaariga, agabka lagu xiro kursiga, nidaamka gaadiidka ee badqabka ah xataa haddii xogtooda aysan isbadelin marka la eego sanadkii hore. Fadlan buuxi foomka*"Cabbirada Agabka Ardayga ee Waxbarashada Gaarka ah"* oo u keen darawalkaaga si loo sameeyo isbadelada cabbirada. Foomkaan waxaa laga heli karaa webseedkeena gaar ahaan bogga ilaha shaqaalaha iyo Waalidka.

- Habraacyada Dejinta Ardayga:
    - Dhammaan ardayda waa in lagula kulmo albaabka baska dugsiga ama waa inuu qof masuul ah keeno albaabka gaariga. Waalidiinta ama Masuuliyiinta waxay ka laaban karaan shuruudaha kaliya kadib marka ay si guul leh u buuxiyaan foomka *"Badelka Xaalada dejinta"* ardayda. Foomkaan wuxuu u ogolaanayaa ardayda in laga tago ayagoon cidna wehlin ama uu isha ku hayo qof masuul ah, halkii lagu kulmi lahaa gaariga. Foomkaan waxa laga heli karaa xafiiska maamulka ee dugsigaaga ama webseedka bogga ilaha Waalidka iyo shaqaalaha.
        - Si uu u noqdo wax ku ool foomka "*Xaalada Badelka Dejinta Ardayga"* waa inuu saxiixo Waalidka/Masuulka KU qoran faylka Gaadiidkaa Ardayga. U oggoloow 24 - 48 saacadood xafiiska gaadiidka inuu ka shaqeysiiyo codsigaaga.

    - Ardayda aan loo imaan labo daqiiqo gudaheed kadib marka la dejiyo waqtiga iyo goobta loo qoondeeyay waxaa dib loogu celinayaa dugsigoodii asalka ahaa. Haddii aan lagula soo xariiri karin, Booliska Portland ayaa la wici doonaa masuuuliyadaadana waxaa lagu wareejin karaa Waaxda Adeegyada Dadwaynaha (DHS).

Waxaan ku dadaaleynaa inaan heerka adeegga ugu sareeya siino adiga iyo qoyskaaga. Si aan sidaan u sameyno waxaan u baahanahay caawimadaada iyo jawaab celintaada wax ku oolka ah si aan u gaarno xitaa heerar sare oo adeega macaamiisha aan siino ama u saxno dhibaato kasta oo aad la kulanto.

Fadlan nagu caawi inaan si fiican u bixino adeegyadaada gaadiidka adiga oo bixinaaya jawaab celin noona sheegaysa isbadeladaada isla marka aad ogaato. Halkaan waxaa ku qoran sida aad qaab toos ah noola soo xariiri karto ama aad ku heli karto xog ku saabsan Gaadiidka Ardayga.

Webseedka Gaadiidka Ardayda: http://www.pps.net/bus

Foomamka Cabbirada iyo Xaaladaha La kulmida, Hitcher,: https://www.pps.net/Page/179
Iimaylka: transportation@pps.net.
Taleefanka: 503.916.6901.

Waxaan rajeyneynaa inaan adiga iyo ardaygaaga la shaqeyno sanadkaan. Mahadsanid.